

Gillette Children's Specialty Healthcare waxay taageertaa daadinta dawooyinka aan la isticmaalin si ka deegaan ahaan iyo ka bulsho ahaan mas'uuliyad leh. Dib uma qaadan karno dawooyinka haray, laakiin waxaanu bixinaa macluumaad ku saabsan sida loo daadiyo dawooyinka hadhay sida ugu badbaado badan oo ugu macquulsan.

Waa muhiim INAAN haysan dawooyinka dheeraadka ah ka dib markaad dhammaysto isticmaalkooda, gaar ahaan obiyadhka (daawada xanuun baabi'iyaha) iyo walxaha la xakameeyay sida oxycodone ama diazepam (lagu daaweeyo walwalka). Waxaa lagugula talinayaa inaad daadiso obiyadhka (daawada xanuun baabi'iyaha) aan la isticmaalin haddii aan la isticmaalin muddo labba todobaad ah ka dib jirada degdeg ah oo daran ama qalliin.

## Barnaamijyada Daadinta Dawada

Degmooyin badan iyo wakaaladaha dhaqan gelinta sharciga maxaliga ah ayaa waxay ka qaybqaataan Maalmaha Dib-u-Qaadashada ama qubista baakadaha sanad jirsaday si looga caawiyo dadka deegaanka inay si badbaado leh u daadiyaan dawooyinka aan la doonayn.

Tani waa Waybsaydka [Wakaalada Dhaqan gelinta Dawada \(DEA\)](https://www.dea.gov/takebackday?src=deatakeback.com) (Lifaaqa Waybsaadka: <https://www.dea.gov/takebackday?src=deatakeback.com>) wuxuu kaa caawin karaa inaad hesho goobta dib u qaadashada oo diiwaan gashan. Waxaad raadin kartaa goobta kuugu dhow oo lagu rido adigoo gelinayya lambarkaaga boostada ama magaalada.

Waxaa jira weelka qashinka oo lagu rido dawada la daadinaayo ee dadwaynaha oo ku yaala isla dhismaha Gillette's St. Paul Clinic Irida wayn ee dadku ka gaalaan Regions Hospital, sidoo kale loo yaqaano Irida Koonfureed waxay leedahay "Dib-U-Cesho" meesha dawada lagu rido. Weelkaan oo amnigiisa la sugay waxaa uu ku yaalaa dabaqa 1-aad ee u dhow wiishashka koonfurta jira. Waxaa la heli karaa sanadkoo dhan si dawada loogu rido.

## Ma jirto miyaa Meel Dawada Lagu Rido Aagaaga?

Wixii macluumaadka dheeri ah oo ku saabsan sida haboon ee loogu daadiyo dawooyinka aan lagu isticmaalin guriga, booqo [bogga macluumaadka ee FDA-da](https://www.fda.gov/consumers/consumer-updates/where-and-how-dispose-unused-medicines) (lifaaqa: <https://www.fda.gov/consumers/consumer-updates/where-and-how-dispose-unused-medicines>).

Keep this and all medicines out of reach of children. Dispose of all unused medicine after treatment is completed. Wash your hands carefully before and after giving medicine. If you use a dropper or syringe, wash it after each use. If too much or the wrong kind of medicine is taken, call Poison Control at 1-800-222-1222. Certain over-the-counter medicines and herbs can make some conditions worse or can be harmful when taken with other medicines. Tell your doctor if you are taking any OTC medicines or herbs. If you have any questions or concerns, please call the Gillette Telehealth nurse at 651-229-3890.